# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

## لـولايــة DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

## أرض بــونـت الـصـومــال

Sannadka 2 aad Garoowe, 31 Luulyo 2000 **Lam. 7**

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA** جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

---

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.


---

**TUSMADA**

**Qaybta Koowaad**

**Sharci**


- **Sharci Lam. 10** ee 29/07/2000, (Garoowe) kuna saabsan ka hortaga go'aamada Carta "Jabuuti" ..................... **Bogga. 67**


**Qaybta Labaad**

Xeer


- Xeer – Sharci Madaxwayne L . 2 ee 24 Luulyo 2000, oo loo rogay sharci gaar ah ee10 Taariikhdiisu ahayd Luulyo 29 /07 /2000 (Garoowe)..................... **Bogga 69**
- Xeer – Sharci Madaxwayne L.2 (Xeer – Sharci Gaar ah) Luulyo 24/07/2000... **Bogga 71**


**Qayta Saddexaad**

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.

**Waxba ma leh**

Saxid Qalad.

Sharci Lambarkiisu yahay 9 ee 29/0 /2000, kuna saabsan go'aamada Carta, waa in loo akhriyaa sidan ( Sharci L.10 ).

| DAWLADDA PUNTLAND **EE SOOMAALIYA** | PUNTLAND STATE OF **SOMALIA** |
|---|---|
| *XAFIISKA MADAXWEYNAHA* | *OFFICE OF THE PRESIDENT* |

Ref: Sharci Lam10 ee 29/07/2000 (Garoowe) kuna saabsan ka hortaga go'aamada Carta(Jabuuti).

Garoowe, Luulyo 30,2000

**MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,**

**MARKUU ARKAY** Axdiga Dawladda Puntland,

**ISAGOO TIXGELINAYA** Ansixinta Golaha wakiillada ee ku cad warqadda sumadeedu tahay XGGW/109/2000, taariikhdeeduna tahay Garoowe, Luulyo 29, 2000,

## WUXUU SOO SAARAYAA

Sharcigan gaarka ah ee soo socda:-

## QODOBKA 1AAD

Qaanuunka ka hortagida go'aamada Carta (Jabuuti) ee Dawladda Puntland ee sharcigan ku lifaaqan waa la ansixiyey.

## QODOBKA 2AAD

Sadex nuqul oo sharcigaan ka mid ah ee uu saxiixay Madaxweynaha iyo lifaaqiisa, waxaa loo qaadanayaa asal (Original), waxaana lagu kala kaydinayaa Xafiiska Garyaqaanka Guud hal nuqul, Xafiiska Xoghayaha Golaha Wakiillada hal nuqul iyo Xafiiska Xoghaynta Madaxtooyada hal nuqul.

## QODOBKA 3AAD

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Dawladda, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda, wuxuu sharcigani ka mid noqonayaa shuruucda gaarka ah ee dalaka Puntland, qofkastaana waxaa ku waajib ah inuu dhawro kuna dhaqmo.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

*XAFIISKA MADAXWEYNAHA*

**PUNTLAND STATE OF**
**SOMALIA**

***OFFICE OF THE PRESIDENT***

---

XEER SHARCI MADAXWEYNE No: 2 (**Xeer sharci gaar ah**) Luulyo 24, 2000
**Oo loo rogay sharci gaar ah Lam.19 ee Tr 29kii Luulyo, 2000 (Garoowe)**

**MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,**

**MARKUU ARKAY** Axdiga Dawladda Puntland qodobadiisa 1.4, 1.7, 32.1,

**MARKUU DERSAY** Dunuubta lidka ku ah jiritaanka, midnimada iyo nabadgelyada D.G. Puntland,

**MARKAY U XAQIIQOWDAY** warbixintii iyo tala soo jeedintii Madaxweyne K/Xigeenka & Isimada Puntland ee ka soo laabtay shirkii Carta (Jabuuti),

**MARKII LA GARWAAQSADAY** laguna qancay inaan qaabka ka qaybgalidda iyo ka qaybgalayaasha shirkaasi sinaba dani ugu jirin, uuna yahay mid lidi ku ah midnimada, xornimada iyo sharafta ummadda Puntland,

**IYDOO LA XOOJINAYO** lana meelmarinayo go'aannadii Golayaasha Baarlamanka iyo xukuumadda ee ahaa inaan laga qaybgelin shirka la marin habaabiyey ee Carta (Jabuuti),

**IYADOO LA TIXGALINAAYO** Arrimaha kor ku xusan,

**<u>MADAXWEYNUHU WUXUU SOO SAARAY SHARCIGAN GAARKA AH EE SOO SOCDA:</u>**

## QODOBKA 1AAD

Dawlad goboleedka Puntland ma ictiraafayso mana aqoonsanayso go'aanada ka soo baxa shirka Carta ee Jabuuti.

a) Cidkastoo laga soo magacaabo shirkaas derejo kasta ha sheegtee, waxaa loo aqoonsanayaa eedaysane, islamarkaana la horgaynayo Hay'adaha shuruucda ee ku shaqada leh.
b) Cidkasta oo sidoo kale, lagu magacaabo go'aanada Carta ee Jabuuti, meel kasta ha joogee wuxuu la mid yahay (Xarafka a ee kore).
c) Cidkastoo soo hujunta, magac kasta ha sheegtee xuduudaha Puntland, Dawladdu waxay xaq u leedahay in ay iska daafacdo.

d) Cidkasta oo go'aanada Carta lagu soo magacaabo ee ka tanaasusha magacaabida xilkaas, Dawladda Puntlandna ku qanacdo tanaasulidaas wax dambi ah loo raacanmaayo.

**QODOBKA 2$^{AAD}$**

Cidkastoo isku dayda inuu/inay jebiyaan qaraarkii ka soo baxay xukuumadda ee ku saabsanaa aqoonsi la'aanta Puntland ee shirka Carta (Jabuuti) ee Taariikhaha Boosaaso, 23$^{kii}$ Maarso 2000 (Xukuumadda & Baarlamaanka), Garoowe, 17$^{kii}$ Juun 2000 (Xukuumadda), 17$^{kii}$ Juun 2000 (Go'aanka Golaha Wakiillada), Waxaa lagu qaadayaa qawaaniintii Puntland.

a) Cidkastoo bareer ahaan u diida qaraarkii lababda gole ee kore, waxaa la horgaynayaa Hay'adaha shuruucda fuliya.

**QODOBKA 3$^{AAD}$**

Cidkastoo shacabka Puntland u abaabusha, u ololaysa kuna dhiiri galisa go'aanada ka soo baxa shirka Carta (Jabuuti), waxaa lagu qaadayaa tallaabo qawaaniinta Puntland waafaqsan.

**QODOBKA 4$^{AAD}$**

Cidkastoo go'aanada shirka carta (Jabuuti) si cad awood dhaqaale iyo mid qalab ugu taageerta waxaa lagu qaadayaa shuruucda ummadda Puntland.

**QODOBKA 5$^{AAD}$**

Cidkastoo khalkhal galisa degenaanshaha nabadgelyada iyo midnimada ummadda Puntland, una adeegaysa danaha shirka Carta waxaa lagu qaadayaa qawaaniintii ummadda Puntland.

**QODOBKA 6$^{AAD}$**

Nabadayn iyo dib u heshiisiin kasta oo aan ahayn kan Carta (Jabuuti) ka socda oo cadaalad ku salaysan D.G Puntland way soo dhawaynaysaa, waana ka qayb galaysaa.

**QODOBKA 7$^{AAD}$**

Hay'adaha shuruucda iyo kuwa amnigu waajibaadkooda ku wajahan arrimaha kore waa inay gutaan.

**QODOBKA 8$^{AAD}$**

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, ka dibna faafintaa lagu soo saarayaa.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

*XAFIISKA MADAXWEYNAHA*

**PUNTLAND STATE OF**
**SOMALIA**

*OFFICE OF THE PRESIDENT*

XEER SHARCI MADAXWEYNE No: 2 (**Xeer sharci gaar ah**) Luulyo 24, 2000

**MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,**

**MARKUU ARKAY** Axdiga Dawladda Puntland qodobadiisa 1.4, 1.7, 32.1,

**MARKUU DERSAY** Dunuubta lidka ku ah jiritaanka, midnimada iyo nabadgelyada D.G. Puntland,

**MARKAY U XAQIIQOWDAY** warbixintii iyo tala soo jeedintii Madaxweyne K/Xigeenka & Isimada Puntland ee ka soo laabtay shirkii Carta (Jabuuti),

**MARKII LA GARWAAQSADAY** laguna qancay inaan qaabka ka qaybgalidda iyo ka qaybgalayaasha shirkaasi sinaba dani ugu jirin, uuna yahay mid lidi ku ah midnimada, xornimada iyo sharafta ummadda Puntland,

**IYDOO LA XOOJINAYO** lana meelmarinayo go'aannadii Golayaasha Baarlamanka iyo xukuumadda ee ahaa inaan laga qaybgelin shirka la marin habaabiyey ee Carta (Jabuuti),

**IYADOO LA TIXGALINAAYO** Arrimaha kor ku xusan,

## MADAXWEYNUHU WUXUU SOO SAARAY XEER SHARCIGAN SOO SOCDA:

## QODOBKA 1^AAD^

Dawlad goboleedka Puntland ma ictiraafayso mana aqoonsanayso go'aanada ka soo baxa shirka Carta ee Jabuuti.

a) Cidkastoo laga soo magacaabo shirkaas derejo kasta ha sheegtee, waxaa loo aqoonsanayaa eedaysane, islamarkaana la horgaynayo Hay'adaha shuruucda ee ku shaqada leh.
b) Cidkasta oo sidoo kale, lagu magacaabo go'aanada Carta ee Jabuuti, meel kasta ha joogee wuxuu la mid yahay (Xarafka a ee kore).
c) Cidkastoo soo hujunta, magac kasta ha sheegtee xuduudaha Puntland, Dawladdu waxay xaq u leedahay in ay iska daafacdo.

d) Cidkasta oo go'aanada Carta lagu soo magacaabo ee ka tanaasusha magacaabida xilkaas, Dawladda Puntlandna ku qanacdo tanaasulidaas wax dambi ah loo raacanmaayo.

## QODOBKA 2^AAD

Cidkastoo isku dayda inuu/inay jebiyaan qaraarkii ka soo baxay xukuumadda ee ku saabsanaa aqoonsi la'aanta Puntland ee shirka Carta (Jabuuti) ee Taariikhaha Boosaaso, 23^kii Maarso 2000 (Xukuumadda & Baarlamaanka), Garoowe, 17^kii Juun 2000 (Xukuumadda), 17^kii Juun 2000 (Go'aanka Golaha Wakiillada), Waxaa lagu qaadayaa qawaaniintii Puntland.

a) Cidkastoo bareer ahaan u diida qaraarkii lababda gole ee kore, waxaa la horgaynayaa Hay'adaha shuruucda fuliya.

## QODOBKA 3^AAD

Cidkastoo shacabka Puntland u abaabusha, u ololaysa kuna dhiiri galisa go'aanada ka soo baxa shirka Carta (Jabuuti), waxaa lagu qaadayaa tallaabo qawaaniinta Puntland waafaqsan.

## QODOBKA 4^AAD

Cidkastoo go'aanada shirka carta (Jabuuti) si cad awood dhaqaale iyo mid qalab ugu taageerta waxaa lagu qaadayaa shuruucda ummadda Puntland.

## QODOBKA 5^AAD

Cidkastoo khalkhal galisa degenaanshaha nabadgelyada iyo midnimada ummadda Puntland, una adeegaysa danaha shirka Carta waxaa lagu qaadayaa qawaaniintii ummadda Puntland.

## QODOBKA 6^AAD

Nabadayn iyo dib u heshiisiin kasta oo aan ahayn kan Carta (Jabuuti) ka socda oo cadaalad ku salaysan D.G Puntland way soo dhawaynaysaa, waana ka qayb galaysaa.

## QODOBKA 7^AAD

Hay'adaha shuruucda iyo kuwa amnigu waajibaadkooda ku wajahan arrimaha kore waa inay gutaan.

## QODOBKA 8^AAD

Xeer sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka Baarlamanku sharci u rogo, Madaxweynuhuna saxiixo, faafintana lagu soo saaro.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda